# PARTICIPATORY BUDGETING (BARNAAMIJKA KA QAYB-GALINTA DADKA QOONDEYNTA MIISAANIYADA) MAGAALADA BOSTON

*WARBIXIN KOOBAN*

## WAA MAXAY PARTICIPATORY BUDGETING (BARNAAMIJKA KA QAYB-GALINTA DADKA QOONDEYNTA MIISAANIYADA)?

Participatory Budgeting (PB) waa hannaan dimuqraadi oo xubnaha kala duwan ee bulshada u suurto gelinaya inay si toos ah uga qayb qaataan go'aaminta sida loo isticmaalayo qayb ka mid ah miisaaniyadda dowlada. Participatory Budgeting waa hannaan kor u qaadi kara dimuqraadiyadda, dhisi kara bulshooyin adag, gacan weyna ka geysan kara qaybinta kheyraadka dadweynaha si ka cadaalad badan sidii hore. Magaalooyin badan oo ku yaala dalka Maraykanka, oo ay ka mid yihiin New York, Chicago, Durham, Cambridge, iyo Somerville ayaa qaatay oo dhanqangeliye hanaanka PB si loo kordhiyo wadashaqaynta xuquuqaha maxaliga ah ee rayidka iyo miisaaniyadda dhammaan xubnaha dadwaynahooda.

## ORSAMENTU PARTISIPATIVU NA BOSTON

Office of Participatory Budgeting (Xafiiska Barnaamijka Ka Qayb-galinta Dadka Qoondeynta Miisaaniyada, OPB) waxaa lagu aasaasay Xeer rasmi ah guga sanadkii 2023. Hadafka Xafiiska ah inuu siyo dadweynaha ku dhaqan magaalada Boston dhabbo sax ah ee ay kaga qaybgeli karaan hanaanka Misaaniyadda ee Magaalada. Iyadoo la adeegsanayo wareegyada sanadlaha ah ee PB, Xafiisku wuxuu la shaqeynayaa bulshada si loo horumariyo mashaariicda diiradda saara bulshada kuwaas oo kor u qaada sinnaanta bulsho iyo tan qowmiyadeed.

Inta lagu guda jiro Wareegga Labaad ee **Hawlgelinta Fikradaha**, hanaanka PB ee Boston, dadweynaha ku dhaqan magaalada Boston ayaa ka qaybqaadan doona door firfircoon ee ku aadan aqoonsishada, qaabaynta, iyo mudnaanta ee fikradaha mashaariicda si loo xalliyo baahiyaha maxalliga ah, iyadoo isla markaana gacan laga geysanaayo wacyigelinta miisaaniyadda sanadlaha ah ee Magaalada. Dadaka degaanka ah waxay si wadajir ah ula shaqeyn doonaan Xafiiska Participatory Budgeting, Guddigiisa Kormeerka Dibadda, Waaxaha Magaalada ee khuseeysa, iyo ururrada bulshada si ay uga caawiyaan go'aaminta u-qalmitaanka iyo suurtagalnimada fikradaha mashaariicda ee bulshada ay soo hindistay.

Xafiiska OPB iyo Guddigiisa waxay diyaariyeen "Buugga Xeerarka Barnaamijka Ka Qayb-galinta Dadka Qoondeynta Miisaaniyada" si uu u bixiyo hab-raac guud iyo xeerar la dejiyay oo loo dhanyahay iyo hawlgallo lagu hago hirgelinta hindisahan ee magaalada Boston.

### JAANTUSKA 1: MUDDADA IYO TAARIIKHAHA HANAANKA PB EE WAREEGGA 2025–2026



# GOORTA IYO SIDA LOOGU QAYBQAATO HAWLGELINTA FIKRADAHA, HANAANKA PB EE MAGAALADA BOSTON!

**URURINTA FIKRADAHA** *(Lulyo 2025)*

Dadka ku dhaqan magaalada Boston waxay heli doonaan siyaabo kala duwan oo ay fikradahooda mashruuc ugu gudbin karaan Office of Participatory Budgeting. Bishii Luulyo, barnaamijka Howlgelinta Fikradaha wuxuu bilaabi doonaa Ol'ole Fikrad Uruurin oo quseysa guud ahaan magaalada, kaas oo u furan dhammaan dadka ku dhaqan magaalada Boston. Fikradaha waxaa lagu soo gudbin karaa iyadoo la adeegsanayo Bogga Xafiiska PB ee onlaynka ah, khadka taleefanka ee PB, si shakhsi ahaan ah in loo geeyo laamaha Maktabadda Dadweynaha (Public Library) iyo Hoolka Magaalada (City Hall), iyo sidoo kale munaasabadaha la qabto iyadoo la kaashanaayo ururrada bulshada.

***Shuruudaha iyo U-qalmitaanka Mashruuca***

Hanaanka PB wuxuu mudnaanta siiyaa fikradaha mashaariicda ee xoojinaya awoodda wadajirka ah ee wax looga qabto arrimaha caddaaladda bulsho iyo qowmiyad. Fikradaha mashaariicda waxaa soo gudbin kara dhamman dadka ku dhaqan Magaalada Boston, iyadoo loo eegaynin da'da, waxaan waajib ah in la buuxiyo shuruudaha u-qalmitaanka ee soo socda:

- Mashaariicda waxay ku kooban tahay kharash hal mar la bixiyo, mana abuuri karto shaqooyin cusub oo joogto ah;
- Soo jeedinnada mashaariicda waxay ka koobnaan karaa barnaamijyo iyo adeegyo iyo sidoo kale kaabayaasha dhismo; kor u qaadista tignoolaajiyadeed, iyo horumarinnada bulshada ee ku saabsan dhulka dadweynaha ee ay leedahay Magaalada.
  - Mashaariicda kaabayaasha ee lagu sameeyo dhul gaar loo leeyahay, mise ay leedahay dawladda gobolka mise federaalka, lama aqbalo; tusaale ahaan, mashaariicda la xiriira Department of Conservation & Recreation (Waaxda Ilaalinta iyo Madadaalada, DCR) mise Massachusetts Bay Transit Authority (Waaxda Gaadiidka ee Massachusetts Bay, MBTA).
  - Fikradaha mashaariicda ee la xiriira barnaamijyo iyo adeegyo ee lagu qabto xarumo aan magaalada lahayn waa la aqbalayaa.
- Fikradaha mashaariicda waa in ay noqdaan kuwo suurtagal ah in la hirgeliyo, isla markaana la jaanqaadaya siyaasadaha, xeerarka, shuruucda iyo Xeer-dejinta Barnaamijka Ka Qayb-galinta Dadka Qoondeynta Miisaaniyada ee Magaalada; sidokale
- Mashaariicda waa in ay hirgeliso ama ay maamusho Waaxda ama hay'adda Magaalada ee khuseeysa taas oo helaysa miisaaniyad toos ah.

***Tusaalooyinka Fikradaha La aqbali karo:*** Barnaamijyo lagu xoojinayo caafimaadka maskaxda ee dhallinyarada magaalada Boston; Ballaarinaayo khadka WiFi-ga Bilaashka ee Magaalada ah si ay u gaarto aagag badan oo kunool dad dakhligoodu hooseeyo; Bilaabaayo koorsooyin aqoonta dijitaalka ah oo loogu talagalay dadka waaweyn si ay u bartaan xirfado cusub korn loogu qaado la macaamilka bulshada; Hagaajiyo goobaha dadweynaha iyadoo la kashanayo mashaariicda kaabayaasha (barnaamijyada samaynta astaamaha dadwaynaha ee xusuus-reebka leh, ku beerista geedo dhinacyada waddooyinka, dhigista koraaso goobaha dadwaynaha, iwm) Kordhinaaya helitaanka cuntooyin caafimaad leh oo cidna kaga horeynin iyadoo la kashanayo barnaamijyada beerta bulshada mise tallaagooyinka bulshada ee ay maamulaan ururrada maxalliga ah.

***Tusaalooyinka Fikradaha Aan la aqbali kari***: Bixinta mushaarka shaqaale dowladeed si uu u bixiyo adeegyo; Dayactirka ama hagaajinta dhisme gaar loo leeyahay; Caawinta urur si uu u dayactiro meel uu ka kireysto milkiile gaar ah; Caawinta hay'ad diimeed si ay u dayactirto sanamyadeeda; Kordhinta sii socodka iyo soo socodka basaska ama tareenada MBTA; Kordhinta kormeerka, dhaqangelinta sharciga, iyo/ama tallaabooyin kale oo si taban u saameeya dadka ku dhaqan magaalada.

## SOO SAARISTA SOOJEEDINTA (Okt. - Dis. 2025)

OPB wuxuu u qaban doonaa madallo taxane ah dadka ku dhaqan magaalada si ay ugula qaybqataan Waaxaha Magaalada si loo eego, looga doodo, loona qiimeeyo suurtagalnimada iyo saameynta fikradaha mashaariicda ee la soo gudbiyey. Iyadoo adeegsanaayo hannaankan, ka soo-qaybgalayaasha madalka waxay qori doonaan bayaanno lagu qeexayo illaa 15 soo-jeedin oo cod-bixin ah. Dadka ku dhaqan magaalada oo aan awoodin inay ka soo qaybgalaan Madalladan, waxaa loo heli doonaa ikhtiyaar onlayn ah si ay u bixiyaan faallo-celin.

***Warqadda fikrad bixinta ee PB oo ka kooban illaa 15 qoraalo soo-jeedin oo ay qoreen dadka ku dhaqan magaalada ayaa waxaa dhammeystiri doona OPB iyo Guddiga iyaga oo dib u eegaya oo kuna dhafaya faallo-celinta onlanka ee khuseysa. Xafiiska iyo Waaxaha Magaalada ee khuseeysa ayaa sameyn doona qiimeyn kama dambeys ah oo ku saabsan suurtagalnimada, waxayna go'aamin doonaan kharashyada la qiyaasay ee ku baxaya mid kasta oo ka mid ah soo-jeedimaha ku jira warqadda fikrad bixinta.***

## CODBIXINTA, MAALGELINTA MASHAARIICDA, IYO HIRGELINTA (Jan. 2026 - )

Codbixinta ee soo-jeedimaha Barnaamijka Ka Qayb-galinta Dadka Qoondeynta Miisaaniyada waxay u dhici dontaa hab toos ah iyo hab onlayn ah. Warqadda fikrad bixinta ee PB, dadka ku dhaqan Magaalada Boston oo jira ugu yaraan 11 sano (ama dhigta fasalka 6aad) iyo wixii ka weyn waxay dooran karaan shan (5) soo jeedin oo ka mid ah illaa 15, iyadoo mid kasta ku qiimeysan lacagta doolarka. Soojeedinada helay codadka ugu badan ayaa la abaalmarin doona, ilaa xadka maalgelinta wareegga PB-gaas. Magaalada iyo Xafiiska OPB ayaa shaacin doona soojeedinada guuleystay oo ay la socdaan natiijooyinka kama dambeysta ah ee codbixinta. Hirgelinta mashaariicda waxaa si joogto ah ula socon doona Xafiiska OPB iyo Waaxaha Magaalada ee ay khuseyso.

## LA XIRIIR XAFIISKA PARTICIPATORY BUDGETING

Ma dooneysaa qaabab aad uga qeyb qaadato Hawlgalinta Fikradaha? Fadlan la xiriir Xafiiska Participatory Budgeting (Ka Qayb-galinta Dadka Qoondeynta Miisaaniyada)

Websayd: [www.boston.gov/participate](http://www.boston.gov/participate)

Iimayl: [pb@boston.gov](mailto:pb@boston.gov)

